Dhallaanka qaarkood ayaa ayaguna heli doona qiimeyn maqal

Inkastoo dhallaanka badankoodu ay ka gudbaan baaritaanka (baarista) maqalka, dhallaanka qaarkood ayaa loo samayn doonaa “xawilaad natiijo”. Taas macnaheeduna waxa weeye in ay dhallaanku u baahnaan doonaan qiimeyn maqal. Qiimeynta maqalkana waxaa sameeya takhtar ku takhasusay cilmiga barashada maqalka oo aqoon badan u leh maqalka dhallaanka. Barnaamijka Maqalka Dhallaanka ee goboleed ayaa kuu samayn doona ballan.

Dhallaanka hela qiimeyn maqal ayaa badankoodu ah kuwo maqalkoodu uu hagaagu u yahay caadi. Haraa lagu arkay hawo-mareenka dhegta ama xasilooni-darro (sal-ka-fidhiyid la’aan) uu ilmuhu la yimaado marka loo samaynayo baarista maqalka ayaa waxay yihiin sababaha laga yaabo inay keenaan in ilmaha loo sameeyo qiimeyn maqal. Arrintu si kastaba ha’ahaatee, haddii ilmahaaga ay haysato mashaakil dhegoolenimo, takhtar ku takhasusay cilmiga barashada maqalka ayaa idinku jihayn doona adeegyada iyo taageerooyinka la heli karo ee jira si la idiin caawiyo adiga iyo ilmahaagaba.

Barnaamijyada Gobollada ee Maqalka Dhallaanka

Barnaamijyada Gobollada ee Maqalka Dhallaanka ee Onteeriyo waxaa laga fidiyaa adeegyadooda xafiisyo-goboleedyada soo socda:

Hamilton, Wentworth, Niagara, Brant iyo Haldimand-Norfolk
“Early Words / Premiers Mots”
905-385-7927 Kh / Gaarka ah #227
ama 1-866-826-4327 Kh /
Gaarka ah #227
www.ascy.ca/ascy_infanthearing.html

Hoolton, Piil, Wootarluu iyo Wellington-Dhafrin
Central West Infant Hearing Program
905-855-3557
ama 1-877-374-6625
TTY 905-855-4925
www.erinoak.org

Manitoolin–Sadbari, Algooma, Kokreyn, iyo Nibising-Timiskaming
“Wordplay / Jeux de Mots”
1-877-522-6655

Kenoora Reyni Rifar
“North Words”
1-877-553-7122
www.northwords.com

Otowa, Deegaank iyo Degmada Renfiruu iyo Bariga Onteeriyo
“FirstWords”
613-688-3979 ama
1-866-432-7447
TTY 613-820-7427
www.pqhcs.com/firstwords/infant_hearing.htm

Deegaanka Simko iyo Maskooka–Baari Sownd
Children’s Development Services
705-739-5696
ama 1-800-675-1979

Kingistoon, Forontenaak, Lennokis iyo Adhington, Leedhis, Grenfiil iyo Lanark, iyo degmooyinka Heystingis iyo Birins Edhwadh
613-549-1232 Kh / Gaarka ah #145
ama 1-800-267-7875 Kh /
Gaarka ah #145
TTY 613-549-7692
ama 1-866-299-1136
www.healthunit.on.ca

Midhalsekis, Landhan, Okosfoodh, Elgin-St. Thoomas,
Saarniya-Laambton, Huron-Perth iyo Gareey Buruus Oowen Sownd
“tykeTALK / Southwest Infant Hearing Program”
519-663-0273
ama 1-877-818-8255
www.tyketalk.com

Thandhar Bey
Thunder Bay District Health Unit
807-625-5922
1-888-294-6630 Kh /
Gaarka ah #5922
www.tbdhu.com

Magaalada Toronto
Toronto Preschool Speech and Language Services
416-338-8255
TTY 416-338-0025
www.tpsls.on.ca

Gobolka Yoork, Durham, Haalibeerton, Kawaartha iyo Peyn-Rij
“Beyond Words”
1-888-703-5437
TTY 905-773-7282
www.beyond-words.org

Windsar-Essekis iyo Kent-Jaatam
“Talk 2 Me”
(519) 252-0636
www.smflc.ca

Wixii warar ah ee intaasi ka badan, la xiriir:

Dawladda Onteeriyo
INFOline: waa lacag la’aan
1 866 8217770
TTY 1-800-387-5559
www.children.gov.on.ca

Version française disponible en communiquant avec

le 1 866 821-7770
ATS 1 800 387-5559
www.children.gov.on.ca

Catalogue 7710-6135687 SOMALI
December, 2007 ©Queen’s Printer for Ontario

BARNAAMIJKA MAQALKA DHALLAANKA (INFANT HEARING PROGRAM)

Ilmahaagu wax ma maqli karaa?

Ontario

Waa muhiim inaad ogaatid haddii ilmahaagu uu wax maqlayo

Waa muhiim inaad ogaatid haddii ilmahaagu uu wax maqlayo Bilaha iyo sannadaha ugu horreeya nolosha ilmaha dhallaanka ah ayaa waxa ay yihiin kuwo aad muhiim ugu ah horumarinta lugadda. Dhegoolenimada aan la ogaanina waxay ka mid tahay waxyaalaha sababa dib-u-dhac ku yimaada horumarka luqadda. Dib-u-dhaca ku yimaada horumarka luqadduna waxay keeni kartaa mushkilado asluubeed iyo kuwo shucuureed (caadifadeed) marka dambena wuxuu keenaa mushkilado ka dhasha dugsiga gudihiisa.

Sannad kasta Onteeriyo gudaheeda, kunkii (1000) wiilba hal wiil ayaa qiyaastii ku soo dhasha dhegoolenimo ama asagoo dhego-culus. Ayadoo la adeegsanayo Barnaamijka Maqalka Dhallaanka ee Onteeriyo, waxaa dhallaankaasi la heli karaa goor hore waxaana la siin karaa caawimaadda ay u baahan yihiin si ay samaystaan luqad.

Carruurta dhegoolaha ah ama dhego-clus oo badankooda goor hore la ogaaday dhegoolenimadooda, oo isla mar ahaantaasina helay taageeradii ay u baahnaayeen, waxay yeelan doonaan fursad ay ku gaaraan xirfado luqadeed oo la mid ah tan ay helaan carruurta aan ahayn dhegooleyaal.

Baaritaan Maqal ayaa loo heli karaa ilmahaaga

Dhammaan dhallaanka dhawaanta ku dhashay Onteeriyo ayaa baaritaan loogu samayn karaa maqalkooda, marka ay ku dhashaan isbitaalka gudihiisa, ama rug caafimaad oo baaris bulsho. Baaristuna waa lacag la’aan. Waana hab-hawleed oo fudud, laguna kalsoonaan karo, isla markaasna dhakhso leh, oo aan waxba yeelaynin raaxana u leh ilmahaaga.

Teknooloojiyada la isticmaali doono marka baaritsta maqalka loo samaynayo ilmahaaga waxa ay ka kooban tahay ilmahaaga dhegahiisa oo la gasho qalab yar oo wax lagu dhegaysto. Dhawaaqyo fudud ayaana la daaraa oo uu ilmahuhu ku dhegaysan karo qalabkaasi yar oo wax lagu dhegaysto, waxaana la qiyaasaa lana duubaa (rikoorgareeyaa) jawaab-celinta dhegta ilmahaaga. Waxaa suurtagal ah inuu ilmahaagu si raaxo leh u seexdo inta hawshaasi ay socota, adna waxa aad isla markiiba heli doontaa natiijada.

Haddii sabab uun darteed aan baarista maqalka ilmahaaga cusub la samaynin ka hor intaadan ka tegin isbitaalka, la xiriir Barnaamijka Maqalka Dhallaanka ee kuugu dhow kuna dhigan dhabarka buug yarahan.

Dhacdooyinka muhiimka ah ee horumarineed

Dhacdooyinkan horumarineed ee muhimka ah ee hoos ku qoran waxay muujnayaan qaar kamid xirfadaha tilmaamaya horumarka carruurta yar-yar inta ay baranayaan siday wax ula xiriiri lahaayeen. Waxaa kale oo ayana jira qaar kamid ah talo-bixin ku saabsan sidii aad uga caawin lahayd ilmahaaga inuu yeesho hadal xooggan iyo xirfado luqadeed.

Markuu yahay 6 bilood

- wuxu u jeestaa meesha dhawaaqa ama sanqadhu ay ka soo baxayso
- wuxuu ka naxaa buuqa iyo qeylada badan ee kediska ah
- oohin kala duwan kana tarjumaysa baahi kala duwan ayuu sameeyaa – waan gaajays nahay, waan daallanay
- wejigaaguu fiirsadaa markaad hadlayso
- wuu ilka-caddeeyaa waanu qoslaa marka aad u qososho ama u ilka-caddeyso
- wuxuu canjilaa (ku daydaa) qufaca ama dhawaaqyada kale sida – *ah, eh, buh*

Markuu yahay 12 bilood

- wuxuu raacaa jihayn hal-tallaabo ku eg sida “fariiso”
- si gudban ayuu u daya qolka dhexdiisa waxa aad farta ku fiiqayso
- saddex ilaa shan erey ayuu u istcmaalaa si joogto ah oo aan isbeddelayn
- si uu kuula xiriiro, wuxuu isticmaalaa astaan-muujin jireed ama gacmeed – wuu kuu gacan haadiyaa asagoo ku leh “nabad-gelyo”, madaxa ayuu ruxaa isagoo ula jeeda “maya”
- ihtimaamkaaga ayuu hela isagoo isticmaalaya dhawaaqyo, astaan-muujin jireed ama gacmeed iyo farfiiqid isagoo eegaya indhahaaga
- wuxu kuu keenaa waxyaabaaha ay carruurtu ku ciyaarto si uu kuu tuso
- “waxbuu jilaa (matalaa)” si loo eego loona ammaano
- wuxuu isku daraa dhawaaqyo fara badan sidii wax hadlaaya oo kale – *abada baduh abee*
- wuxuu muujiyaa xiiso inuu u hayo buugaagta leh sawirrada ee sahlan

Markuu yahay 24 bilood

- wuxuu raacaa jihayn labo tallaabo ku eg sida –“Orod oo soo hel tedhi-beerkaaga oo tus ayeeyadaa”
- wuxuu isticmaalla 100 ilaa 150 erey
- wuxuu isticmaalaa ugu yaraan labo magac-u-yaal sida – “adiga”, “aniga”, “kayga”
- labo ilaa afar erey ayuu si joogto ah oo aan isbeddel lahayn isku daraa kana sameeyaa jumlado gaagaaban sida – “Koofiyadda aabbo”, “baabuurow hoos u deg”
- wuxuu jecel yahay inuu la joogo carruurta kale
- wuxu bilaabaa inuu siiyo asaagiis waxyaabaha ay carruurtu ku ciyaarto waxaanu kaga daydaa carruurta kale falalka ay sameeyaan iyo ereyada ay yiraahdaan
- 50 ilaa 60 boqolkiiba ayay dadku fahmi kaan ereyadiisa/ereyadeeda
- si dhib la’aan ah oo sahlan ayuu u sameeyaa ereyo iyo dhawaaqyo
- si sax ah ayuu sare ugu qaadaa buugaagta waxaanu rogaa bogagga
- “waxbuu u akhriyaa” xawayaanka cufan ama waxyaabaha ay carruurtu ku ciyaarto
- qallin midab leh ayuu feegaar ku sameeyaa

Dhallaanku waa ay jecel yihiin marka aad:

- Hoos isu gaabiso oo aad isla sinto heerkooda si ay u arki karaan wejigaaga. Waxayna taasi u sheegaysaa in aad xiisaynayso waxa ay qabanayaan ama ay oranayaan. Waxayna arrintaasi u sahlaysaa inay adiga kula fal-galaan.
- Ka daba-dhahdo dhawaaqyada ay sameeyaan. Dhallaanku waxay jecel yihiin inay dhawaaq sameeyaan, waxayna jecel yihiin marka aad si ku cel-celin ah ugu dayato.
- Heesto oo aad qososho, siiba marka aad cuntaysiinayso, qaboys u samaynaysid (u meyrayso jirkooda) dharkana aad ka beddelayso. Xusuusnow inaad kala hadasho ilmahaaga maalinta oo dhan waxa aad qabato ama aragto sida – “Hooyo waxay gashanaysaa jaakaddeeda (koodhkeeda)”, “Kaasi waa gaari weyn oo xammuul-qaad ah”
- U sheegto magacyada waxyaabaha ay fiirinayaan kuna ciyaarayaan. Dhallaanku waxay xiiseeyaan inay sahamiyaan waxna ay ka ogaadaan waxyaabaha ku cusub, waxayna jecel yihiin inay maqlaan waxa uu yahay magacoodu.

Markuu yahay 9 bilood

- wuu jawaab-celiyaa marka magaciisa la sheego
- fal-gal ayuu sameeyaa marka uu maqlo dhawaqa telefoonka ama garaacidda albaabka
- wuu fahmaa marka lagu yiraahdo “maya”
- wuxuu ku helaa ilmuhu wuxu doonayo adeegsiga qaab jir ama gacmo dhaqdhaqaajin ah tusaale., gacantuu soo fidiyaa si sare loogu qaado
- adiga ayuu kula ciyaaraa ciyaaro bulsho tusalale., dhuumaalaysiga
- wuxuu jecel yahay inuu dadka ka ag-dhowaado
- wuu hadaaqaa waxaanu ku soo cel-celiyaa dhawaaqyada sida – *babababa, duhduhdhuh*

Markuu yahay 18 bilood

- wuxuu fahmaa fikradaha ah “gudaha iyo dibedda”, “shidan iyo aan shidnayn”
- wuxuu farta ku fiiqaa dhowr xubnood oo ka mid ah jirka marka la weydiiyo
- wuxuu isticmaalaa ugu yaraan 20 erey una isticmaalaa si joogto ah oo isku si ah
- wuxuu ku jawaab-celiyaa ereyo ama dhaqdhaqaajin jireed ama gacmeed si loo fahmo dareenkiisa ama ra’yigiisa marka la weydiiyo su’aalo sahlan sida “Halkeebuu joogaa Teddy?”, “Waa maxay waxaasi?”
- wuxuu si cad u muujiyaa sidii isagoo ku ciyaaraya waxyaalaha carruurtu ku ciyaarto – cabbitaan ayuu siiyaa teddy, wuxuuna ka dhigaa baaquli sidii oo uu yahay koofiyad
- wuxuu sameeyaa ugu yaraan afar shibbane dhawaaqood – *p, b, m, n, d, g, w, h*
- wuxuu jecel yahay in wax loo akhriyo adigana uu kula eego buugaag
- wuxuu farta ku fiiqaa sawirro isagoo isticmaalaya hal far

Markuu yahay 30 bilood

- wuxuu fahmaa afkaarta xajmiga (weyn/yar) iyo tirada (wax yar, wax badan, ka sii badan)
- wuxuu isticmaalaa naxwaha dadka waaweyn sida – “labo buskud”, “shimbir duuleysa”, “waan booday”
- wuxuu adeegsadaa in ka badan 350 erey
- wuxuu adeegsadaa ereyo fal sida – cararid, daadin, dhacid
- wuxuu bilaabaa inuu ciyaar-wadaagid gaaban la yeesho carruurta kale, isagoo adeegsanaya waxyaabaha lagu ciyaaro iyo ereyo labadaba
- wuxuu muujiyaa walwal marka wiil kale ay waxyeello gaarto ama uu caroodo
- wuxuu isku daraa falal dhowr ah marka uu ciyaar ku gudo jiro wuxuuna cuntaysiiyaa caruusad-ciyaareed (boombalo yar), kadibna wuu seexiyaa; wuxuuna bulukeeti dul saaraa tareen markaas ayuu tareenka kaxeeya kadibna bulukeetiga ka tuuraa tareenka
- dhawaaqyo ayuu ag-dhigaa bilowga ereyad intooda badan
- wuxuu soo saaraa ereyo ka kooban labo ama ka badan oo dhawaaq kala go’an ah ama garaacid-codeed “ba-na-na”, “kom-pu-yuuter”, “tu-faax”
- wuxuu gartaa sumadaha iyo astaamaha la yaqaan – sida summadda dahabka ah ee McDonalds una samaysan sida jeegaanka, astaanta joogsiga ee taraafikada
- wuu xusuustaa waanu fahmaa sheekooyinka la-yaqaan

Carruurta socod-baradka ah way jecel yihiin marka aad:

- U oggolaato inay taabtaan sarena u hayaan buugaag inta aad farta ku fiiqeyso oo aad magacaabayso sawirrada.
- Isticmaasho ereyo dhab ah halka aad kaga hadli lahayd hadal-carruureed sida – “isii aniga” halka aad ka dhihi lahayd *ta ta* ama “dhalo” halka aad ka dhihi lahayd *baba*.
- U hesho waqti aad iyaga ku dhegaysato – waxay kaa rabaan inaad maqashid dhammaan dhawaaqyadooda, ereyadooda iyo fikradahooda cusub.
- Siiso iyaga jihayn sahlan oo ay raacaan sida – “Orod oo raadi kabahaagii buudhka ahaa ee casaa”.
- Isticmaasho ereyo fara badan oo kala duwan marka aad la hadlayso sida – ereyo lid isku ah sida sare/hoos, gudaha/dibedda, ereyada falka ah sida “ordaya”, “biyo-ku-batalaqaysi”, iyo ereyo sifo ah sida “faraxsan”, “weyn”, “yar”, “nadiif ah”, “wasakh ah”.
- Ku dhiirrigeliso inuu ilmahaagu kula ciyaaro carruurta kale – rugta kaydka buugaagta, goobaha kooxaha ciyaartu ay joogaan, seeraha lagu nasto.